

OFFICIAL CITY BUSINESS

1787-00



City of Boston
c/o Constellation
P.O. Box 4911
Houston, TX 77210-4911

Presort First Class
U.S. Postage Paid
Boston, MA
Permit #1736

HA FUDUDEYSAN - OGEYSIIS MUHIIM AH OO KU SAABSAN QIIMAYAASHA KORONTADA



Dariska Qaaliga ahoow,

Maadaama ay tahay magaallo xeebeed,—Boston waxay si gaar ah ugu nugushahay saamaynada isbadalka cimilada—laga bilaabo kor u kaca heerka badda iyo daadadka, ilaa daadadka aadka u daran ee dabaylaha wata iyo dhacdooyinka cimilada. Si aan u difaacno bulshooyinkeena, waxaan u baahan nahay inaan qaadno tallaabooyin la yaab leh si aan u yarayno sunta kaarboonka aana u abuurno magaalada Boston oo leh adkaysi, iyo bii'o dhawrid intaan ka fiican. Ku biirista barnaamijka [Barnaamijka\(Korontada Dookha Bulshada ee Boston \(Boston Community Choice Electricity \(BCCE\)](#) ayaa ah fursad yoolkaas lagu gaaraayo.

Boston Community Choice Electricity waxay bulshada ka qaybgelisaa go'aan ka gaarista tamarta si muhiimada loo saaro bulshooyinka uu saamaynta ugu badan ku reebay isbadalka cimiladu, wuxuuna koronto la cusboonaysiin karo ku bixiyaa qiime jaban looguna talagalay inuu lacag badan badbaadsho. Yoolkeena ayaa ah inaan siino dadka deegaanka iyo ganacsiyada yaryar wakaalad ay ka doortaan sida aan koronto u siin karno bulshooyinkeena, iyo awoodeena aan yoolkaas ku gaari arno koronto la cusboonaysiin karo oo uu heli karo qof kasta—ayadoon laga eegayn eerka dakhliga.

BCCE ayaa bixisa saddex adeeg: [Caadi ah](#), [Aasaasi Ikhtiyaari ah](#), iyo [Tamarta Nadiifta ah ee Ikhtiyaariga ah 100](#). Macaamiisha ayaa xulan kara qorshe ku habboon iskana badali kara markay doonaan ayadoon cidna ganaaxayn. Labadaba Dookhyada Caadiga ah iyo kan Tamarta Nadiifta ah ee 100 ayaa bixinaaya adeeg koronto oo la cusboonaysiin karo oo ka balaaran kan Eversource. Inkastoo uusan barnaamijkaan damaanad qaadi karin lacag kuu badbaada bil gaar ah, dhammaan saddexda adeeg ee BCCE ayaa hadda ka raqiisan Adeegyada Aasaasiga ah ee Eversource ee dadka deegaanka (\$0.25776/kWh) iyo ganacsiyada yaryar, (\$0.26176/kWh), taasoo ka dhigan in qofka deegaanka ee caadiga ah kana diiwaan gashan qorshaha Caadiga ah ee BCCE, kaasoo adeegsada 600 KWh/bishii, uu badbaadsan karo \$90 lacag ah oo uga bixi jirtay korontada ugu yaraa illaa Juun 2023.

Haddii aad awood dhaqaale u leedahay, iskuday inaad iska diiwaan geliso Dookha Cagaaran ee 100 (Optional Green 100) ee BCCE kaasoo ku siinaaya koronto 100% la cusboonaysiin karo kana imaanaysa ilaha sida dabaysha iyo soolarka. Adoo dooranaaya ee Optional Green 100, celceliska korontada la isticmaalo oo dhan 600 KWh/bishii ayaa lagu kaydin karaa in ka badan \$70 bishii oo ku bixi lahayd korontadooda ugu yaraan illaa Juun 2023 marka loo eego Adeegyada Aasaasiga ah ee Eversource. Waxaad arintaas samaynaysaa adoo sidoo kale door muhiim ah ka ciyaaraaya hoos u dhigida wasaqaynta hawada, difaacaaya bii'adeena, kana caawinaaya Boston inay noqoto magaallo ka caagan kaarboonka, oo Ka caagan Wasaqda Hawada.

Macaamiisha ka faa'iidayaan kara taageero dheeraad ah, Eversource ayaa bixisa caawimaado kala duwan iyo qorsheyaal lacag bixin. Waxaad u qalmi kartaa qiimo dhimis dhan 42% ku aadan biilkaaga haddii aad hesho SNAP, WIC, MassHealth, Health Safety Net, SSI, Guriyaynta Dawlada ama La kaabo, Adeegyada Dadka Ciidanka ka fariistay, ama LIHEAP. Ka qaybgalka BCCE wax saamayn ah kuma lahan daymo kasta, qorsheyaasha lacag bixinta ama barnaamijyada qiimo dhimista oo aad ka heli karto Eversource, taasoo sii wadaysa inay maamusho koontadaada korontada. Wixii macluumaad oo dheeraad ah, booqo boston.gov/energy.

Lifaaqa waxaa ku jira Foomka Ogaysiiska Macmiilka oo ay ku jiraan xog muhiim ah oo kaa caawinaysa go'aan ka gaarista inaad iskaga baxdo ama aad si ootomaatig ah ugu biirto barnaamijka. Si aad xog dheeraad ah u hesho, iska diiwaan geli kulanka fool ka foolka ah ee 15 daqiiqo ah adoo booqanaaya calendly.com/bcce. Waxaad sidoo kale wici kartaa **617-635-3850, 3-1-1**, ama iimeel u dir environment@boston.gov si aad u waydiiso su'aalo ama nagusoo booqo barta oonleenka ah boston.gov/community-choice-electricity.

Boston ayaa marhoraba ah mid kamid ah magaalooyinka ugu wasaqda yar Maraykanka, laakiin waxaan awoodnaa, waana qasab, inaan kordhino. Boston Community Choice Electricity waa xeelad wax ku ool ah, qiimo jaban oo naga caawinaysa inaan gaarno yoolalkeena dhaqaalaha iyo bii'ada. Haddii aan iskaashano waxaan awoodnaa inaan dhisno magaalada Boston oo hawo hufan, sinaan u leh jiilalka mustaqbalka. Waxaa la joogaa xiligii aan shaqadaas qaban lahayn. Waad ku mahadsan tahay wada shaqayntaada!

Michelle Wu

Duqa magaalada | Magaallada Boston

Reverend Mariama White-Hammond

Gudoomiyaha | Bii'ada, Tamarta, iyo Hawada



BARNAAMIJKA XULASHADA KORANTADA BULSHADA EE MAGAALADA BOSTON OGEYSIINTA MACAAMIISHA

Maarso 15, 2023

Macaamiil Qaaliga ah ee Adeegga Aasaasiga ah ee Boston:

Magaalada Boston waxay ku faraxsan tahay inay ku dhawaaqdo in **Constellation NewEnergy, Inc.** ("Constellation") loo xushay inay yihiin alaab-qeybiyaha (Barnaamijkeeda Xulashada Korantada Bulshada) Community Choice Electricity Program ("Program"). Barnaamijkaani waa isku geynta dawladaha hoose taasoo gacan ka geysanayo dawlada hoose inay isku darsato awooda wax iibsiga ee deganeyaasheeda iyo ganacsatadeedaba si ay u siiso badelka Eversource Basic Service (M.G.L. c. 164, § 134). Barnaamijkaani wuxuu kaliya saameynayaa qeybta saadka ee biilkaaga bil kasta. Ma saameynayso qeybta geynta saadka ee biilkaaga bil kasta. Eversource way sii wadi doontaa inay bixiso korontadaada laakiin Boston waxay dooratay saad-bixiyaha Barnaamijka. Constellation waxay siin doontaa korontada dhammaan macaamiisha hadda ku jira Adeegga Aasaasiga ah ee Boston. Waraaqdan waxaa loogu talagalay in lagu sheego wax ku saabsan Barnaamijkaan oo loogu talagalay bixinta korantada. Sida waafaqsan sharciga gobolka, waxay kaloo kugu wargalineysaa xuquuqdaada iyo fursadaha aad leedahay haddii aad dooratid inaad ka qaybqaadan Barnaamijka.

- ✓ **SI OTOMAAITIG AH AYAA LAGUUGU DIIWAANGELIN DOONAA BARNAAMIJKA MARKA LAGA REEBO HADDII AAD DOORATID INAADAN KA QAYBQAADAN OO AAD ISKAGA BAXDID.**
- ✓ **WAA INAAD KA JAWAABTAA UGU DAMBEYN ABRIIL 18, 2023 HADDII AADAN RABIN INAAD SI OTOMAAITIG AH LAGUGU DIIWAANGELIYO.**

WAX ISBADEL AH KAMA OGAAN DOONTID ADEEGGA KORONTADAADA. Farqiga kaliya ee aad arki doontaa ayaa ah in Constellation lagu daabici doono qaybta "Adeegyada Saad-qeybiyeyaasha" ee biilkaaga bilaha ah. Waxaad sii wadi doontaa inaad hal biil ka hesho Eversource. Waad sii wadi doontaa inaad u dirto lacagahaaga Eversource si ay u diyaariyaan. Eversource waxay sii wadi doontaa ka jawaabto xaaladaha degdegga ah, waxay akhrin doontaa mitirrada waxayna ilaalin doontaa khadadka qaybinta iyo gudbinta. Isku halaynta iyo tayada adeeggu waxay ahaan doontaa sidii hore. Intaas waxaa sii dheer, waxaad sii heysan doontaa dhammaan xuquuqda macaamiisha jirta iyo ilaalinteeda.

QIIMAHA ISBADELKA IYO SHURUUDAHA

	Barnaamijka Boston* (Adeegyada Saad-qeybiyeyaasha Kaliya)			Eversource (Adeegyada Saad-qeybiyeyaasha Kaliya)
	CAADIGA AH	IKHTIYAARI AASAASIGA AH	IKHTIYAARI GREEN 100	ADEEGGA AASAASIGA AH
Qiiimaha	(caadiga ah)			
Deggaan	\$0.11290 halkii kWh	\$0.10900 halkii kWh	\$0.13987 halkii kWh	\$0.25776 halkii kWh
Sm C&I	\$0.11290 halkii kWh	\$0.10900 halkii kWh	\$0.13987 halkii kWh	\$0.26176 halkii kWh
Med & Lg C&I	\$0.11290 halkii kWh	\$0.10900 halkii kWh	\$0.13987 halkii kWh	\$0.13318 halkii kWh
Nalka wadada	\$0.11290 halkii kWh	\$0.10900 halkii kWh	\$0.13987 halkii kWh	\$0.26176 halkii kWh
Mawduuca Tamarta La Cusboonays iin karo	10% MA Class I RECs oo ka sareeya shuruudaha gobolka ugu yar	Buuxiya shuruudaha tamarta la cusboonaysiin karo ee MA	100% MA Class I RECs	Buuxisa shuruudaha tamarta la cusboonaysiin karo ee Massachusetts
Muddada	Febraayo 2023 - Diisambar 2023 [Qiimayaashu waxaa lagu dabaqayaa adeegga billoodga iyo dhammaadka maalmaha bisha ee mitirkaaga laga akhriyo aaggaaga adeegga.]			Janaayo 1, 2023 – Juun 30, 2023 [Qiimaha Deganaanshaha, C&I Yar iyo Nalka Wadada ayaa isbadela 6dii billoodba mar. Qiimaha Dhexe & Weyn ee C&I ayaa isbedela 3 dii billoodba mar.]
Shuruudaha Bixitaanka	LACAG A'AAN			Waxay heli kartaa lacag dib-u-heshiisiin ama amaah [C&I Weyn oo kaliya ah]

*Qiiimaha waxaa ka mid ah (1) Khidmadda La-Taliyaha ee \$0.0007 halkii kWh si loo fududeeyo (Barnaamijka Xulashada Korantada Bulshada) Community Choice Electricity Program Boston iyo (2) Qadarka ku darida hawlgalka ah oo ah \$0.00008 halkii kWh si loogu maalgeliyo kharashyada shaqaalaha ee la xiriira booska Maareeyaha Tamarta ee Magaalada.

*Sicirka wuu kordhi karaa sababo la xiriira isbaddelka sharciga ee keenaya kororka tooska ah ee kharashyada alaabta inta lagu guda jiro muddada qandaraaska.

MACLUUMAAD MUHIIM AH

- Waqti xaadirkaan, heerka iskudarka waxay ka hooseeyaan qiimaha Asaasiga ah ee Adeega ee Eversource. Qiimaha Isku-darka waa cadad lacag oo go'an oo 10 billood ah (Febraayo 2023 illaa Diseembar 2023) halka qiimaha Asaasiga ah ee Adeega ee Eversource uu isbadelo labo jeer, bisha Janaayo iyo Luulyo. Sababtaas awgeed, qiimaha isku-darka ayaa laga yaabaa inuusan mar walba ka hoosayn qiimaha qiimaha Asaasiga ah ee Adeega ee Eversource. Yoolka guud ee iskudarka waa in la bixiyo kaydadjia inta lagu jiro nolasha Barnaamijka marka loo eego qiimaha Asaasiga ah ee Adeega ee Eversource. Hase yeeshee, **KAYDKA NOOCAAN AH IYO KAYDADKA MUSTAQBALKA LAMA DAMAANAD QAADI KARO.**
- Ma jiraan **WAX LACAG AH EE KA NOQOSHADA** Barnaamijka iyo ku noqoshada Adeegga Aasaasiga ah ee Eversource.

« QAYBTA DAMBE SI AAD U HESHO MACLUUMAAD DHEERAAD AH »

HADII LAGUGU SOO DIRAY OGEYSIISKAAN uma baahnid inaad wax tallaabo ah ka qaadatid ka-qaybgalka Barnaamijka.

DHAMMAAN MACAAMIISHA ADEEGYADA AASAASIGA AH HELA ee loosoo diray ogeysiiskaan waxaa si OOTAMAATIG AH looga qori doonaa Barnaamijka waxayna bilaabi doonaan inay ka faa'ideystaan heerka qiimaha isku-darka ah (aggregation rate) laga bilaabo maalinta koowaad ee bisha Maajo 2023 ee mitirkaaga la akhriyo. Taariikhdaan way ku kaladuwan yihiin nooca adeega. Tirada ku qoran mitirkaaga waxaa lagu muujiyaa biilkaaga.

LA SOCO BILAASHAADA EVERSOURCE SI AAD U HESHO OGEYSIIS DHEERAAD AH ee Barnaamijka.

- Biilkaaga Maajo 2023 wuxuu sheegi doonaa in lagugu wareejinayo Barnaamijka Boston.
- Biilkaaga Juun 2023 wuxuu ku tusi doonaa saad-qeybiyaha iyo heerka isku geynta Boston ee ku hoos qoran "Adeegyada Saad-qeybiyaha"

QORSHAHA MIISAANIYADDA AMA MACAAMIISHA HEERKA DAKHLIGA HOOSE EE U-QALMA ayaa kasii faa'iidayan doona dheefahaas ee ka socda Eversource.

BAALAYAASHA KU SHAQEYA CADCEEDDA IYO MACAMIISHA KA FAA'IIDAYSTA TAMARTA CADCEEDDA ayaa sii wadi doona helitaanka cabiraada saafiga ah ee tamarta ama dhibcaha biilka ah iyagoo helayaa korontada hoos timaada Barnaamijka qiimaha dhibcahaan wax saamayn ah kuma yeelaan doonto ka-qaybgalka Barnaamijka.

CANSHUUR KASTA OO KHUSEYSA WAXAA LAGU SOO DALLACAYAA qeyb ka mid ah kharashka korantada ee Barnaamijka. Adiga ayaa mas'uul ka noqon doona aqoonsiga iyo codsashada ka-dhaafitaan ururinta canshuuraha adigoo bixinaya dukumiintiyada habboon.

MACAAMIISHA GANACSIYADA YARYAR AAN CANSHUURTA LAGA QAADIN waa inay si toos ah nuqul ka mid ah Shahaadada Cafiska Tamarta ugu diraan iimayl ama fakis ahaan Constellation ciwaanka CNETaxForms@constellation.com ama (877) 243-4968 (fakis) si loo ilaaliyo canshuur dhaafkooda.

HADDII AAD HOREYBA U DOORATAY SAAD-QEYBIYAHA TARTANKA KALIGAA waa inaad ka baxdaa Barnaamijkaan. Tani waxay xaqiijin doontaa inaad korontadaada ka sii hesho Saad-qeybiyahaas Tartameysa.

HADDII AAD DURBA DOORATAY IKHTIYAARKA QUWADA KORONTADA CAGAARAN EE LOO MARO EVERSOURCE kaqaybqaadashadaada gudaha Barnamijkan saameyn kuma yeelan doono kaqeybqaadashadaada Quwada Korontada Cagaaran.

HADDII AADAN RABIN INAAD KAQAYB GASHO BARNAAMIJKAN waad: 1) Ka-bixi karta iyo waxaaadna sii wadi doonta bixinta heerka Adeegga Aasaasiga ah ee Eversource; ama 2) Ka-bixi karta waxaadna xullan kartaa Saad-qeybiye Tartameysa aad doontid (haddii mid aad heli karto).

SIDA LOOGA BAXO

- Saxiix oo ku soo celi kaarka ka-bixidda ee ku lifaaqan baqshadda boostada lagu bixiyay; **AMA**
- Booqo boston.gov/community-choice-electricity oo guji badhanka ka-bixitaanka, ka dib buuxi oo soo gudbi Foomka Ka-Bixitaanka; **AMA**
- Constellation ka wac (833) 930-3161 oo codso inaad kusii sugnaato Adeegga Aasaasiga ah ee Eversource.

WAKHTI KASTA OO DIIWAANGELINTA KADIB wali waad iskaga bixi kartaa adigoon bixinin WAX LACAG AH. Waxay qaadan kartaa dhowr wareeg ee biil bixinta kahor intaadan kusoo noqon Adeegga Aasaasiga ah ee Eversource. Haddii aad doorato inaad ka baxdo diiwaangelinta billoowga ka dib, waxaad ku soo gudbin kartaa foomka Ka-Bixitaanka boston.gov/community-choice-electricity **AMA** Constellation ka wac (833) 930-3161 oo codso inaad kusii sugnaato Adeegga Aasaasiga ah ee Eversource.

SI LOO DOORTO BADEECAD AASAASI AH AMA BADEECAD LEH 100% TAMARTA DIB LOO CUSBOONAYSIIN KARO EE NEW ENGLAND

Booqo boston.gov/community-choice-electricity ama waxaad Constellation ka wici kartaa (833) 930-3161 oo aad codsato in lagugu diiwaangeliyo mid ka mid ah badeecadaha soo socda:

- **Badeecadda Aasaasiga ah ee Ikhtiyaariga ah ee Boston** waxay buuxisa shuruudaha tamarta la cusboonaysiin karo ee Massachusetts. Badeecadan waxaa lagu bixiyaa \$0.10900 halkii kWh muddo 10 billood ah (Febraayo 2023 illaa Diisambar 2023).
- **Badeecadda Ikhtiyaariga ah ee Green 100 ee Boston** wuxuu bixiyaa 100% MA Class I RECs lagu gaarey iibsashada 78% (Shahaadooyin Tamarta Cusboonaysiinta ah) Renewable Energy Certificates (RECs) oo ka sarreysa shuruudaha gobolka ee wakhti-xaadirka loogu talagalay dib-u-cusboonaysiinadan. Badeecadan waxaa lagu bixiyaa \$0.13987 halkii kWh muddo 10 billood ah (Febraayo 2023 illaa Diisambar 2023).

SI AAD U HESHO MACLUUMAAD DHEERAAD AH oo ku saabsan Barnaamijka Boston, fadlan booqo boston.gov/community-choice-lectricity ama lacag la'aan naga soo wac (855) 402-5868. Si aad wax badan uga barato Constellation, fadlan booqo constellation.com/ma-boston.

SI AAD U HELISO QIIMEYNTA ADEEGYADA AASAASIGA AH fadlan booqo:

- Sicirka Guryaha – eversource.com/content/residential/account-billing/manage-bill/about-your-bill/rates-tariffs/electric-supply-rates.
- Sicirka Ganacsiga – eversource.com/content/business/account-billing/manage-bill/about-your-bill/rates-tariffs/electric-supply-rates.



BARNAAMIJKA XULASHADA KORONTADA BULSHADA BOSTON KAARKA JAWAAB-CELINTA KA BIXITAANKA

Ciwaanka Adeegga:

Koodhka Ka-Bixitaanka

X

Saxiixa

Taariikhda

Haddii aad abto in aad kaqayb qaadato (Barnaamijka Xulashada Korontada Bulshada Boston) Community Choice Electricity Program, uma baahnid inaad wax tallaabo ah qaadatid. Si otomaatig ah ayaa lagu diiwaangelin doonaa.

Tilmaamaha Ka-Bixitaanka

haddii aadan rabin inaad kaqaybqaadato:

- 1) Saxiixa iyo taariikhda
- 2) Place innevel provi
- 3) Ku soo dir boostada

Kaarka waa inuu saxiixaa macaamilka diiwaanka uu magaciisu ku yaal ciwaanka kaarkan. **Baqshadda waa in lagu dhejiya calaamada boostada ugu dambayn abriil 18, 2023 si looga baxo Barnaamijka kahor intaan si otomaatig ah lagugu diiwaangelin.**

Lambarkab Akoonka: